



Ku waalidka iyo dhallinyarada qaxootinimo ku yimi

Xidhiidh ma la yeelatay hay'adda daryeelka carruurta (barnevernet)?

Ma rabtaa in aad ka warbixisid khibradaa aad u yeelatay?

Waxa aad markaa ka qaybgeli kartaa mashruuc cilmi-baadhis ah!



Khibradaadu waa muhiim!

Waxa aannu rabnaa in aannu xog dheeraad ah ka ogaano sida qoysaska ku yimi qaxootinimadu u arkaan xidhiidhka ay la yeesheen hay'adda daryeelka carruurta ee Noorway. Taas daraadeed khibradaadu qiimo weyn ayey noo leedahay.

Yaa ka qaybgeli kara?

- Waalidka ku yimid qaxooti/magangelyo ahaan
- Dhallinyarada (16 sanno ama ka weyn) ku timid qaxooti/magangelyo ahaan

Muxuu ka kooban yahay ka qaybgalku?

Ka qaybgalayaasha waxa lagu casuumayaa wadahadal ay la yeelanayaan cilmi-baadhe (1-2 jeer). Wadahadaladu waxa ay ku saabsanaan doonaan khibradaada, waxaana lagu hadlayaa af-noorweiji, af-ingiriisi iyo af-faransiis. Luuqadaha kale turjumaan ayaa loo dalban karaa. Cilmi-baadhaha waxa saaran waajib sir-qarin, xogtana waxa loo maareyn rabaa qaab sugan.

Ma rabtaa in aad ka qaybgashid, ama ma qabtaa su'aalo, la soo xidhiidh maareeye-mashruuc Marte Knag Fylkesnes:

	<p>Marte Knag Fylkesnes Maareeye / cilmi-baadhe Tel: 55 58 39 70 Mob: 40 64 50 69 Marte.Fylkesnes@hemil.uib.no www.uib.no/hemil</p>
---	---